

# WAXBARASHO BILAASH AH AYAA KA DHIGAYSA KOLEEJKA MID SUURTAGAL U AH REER MINNESOTA OO BADAN

## Taasi waa Ballanqaadka North Star.

Barnaamijka North Star Promise waxaa loo sameeyay in uu bixiyo waxbarasho bilaash ah si waxbarashada dugsiga sare ka dib uga dhigto mid u suurtagasha arday badan iyo qoysas badan oo Minnesota ku nool.

### Qaado shahaado jaamacadeed. Hel shahaado xirfadeed. Baro farsamo gacmeed.

Dhammaan jaamacadaha iyo kulliyadaha waxbarashada sare ee dawlga ah ee Minnesota iyo Kulliyadaha Qabiilka waxay u qalmaan waxbarasho bilaash ah iyada oo loo marayo North Star Promise. Waxbarashada bilaashka ah waxaa laga heli karaa:

- Dhammaan Kulliyadaha iyo Jaamacadaha Minnesota State
- Dhammaan xarumaha Jaamacadda Minnesota
- Dhammaan Kulliyadaha Qabiilka

Barnaamijka North Star Promise wuxuu u furan yahay dhammaan ardayda deggen Minnesota ee leh Dakhlaga Guud ee La Hagaajiyay ee qoyska (Adjusted Gross Income – AGI) oo ka yar \$80,000, sida lagu soo sheegay Codsiga Bilaashka ah ee Gargaarka Ardayda Federaalka (FAFSA) ama Codsiga Minnesota Dream Act.

### Tagista kulliyadda macnaheedu ma aha in aad gasho deyn aad u weyn.

Sii wadista waxbarashadaadu waxay kaa caawin kartaa inaad gaarto meel ka fog oo aad nolasha wax badan ka qabato, gaar ahaan adigoo culayska deynta ku xanibnayn. North Star Promise waxa uu daboolaa ilaa 100% kharashaadka waxbarashada (tuition) iyo khidmadaha qasabka ah, wuxuuna kaa caawinayaa inaad hesho waxbarashada aad rabto adigoo qaadin deyn aad u badan.

Qadarka saxda ah ee maalgelinta aad heli karto waxaa lagu xisaabiyaa hab loo yaqaan “last-dollar.” Tani micnaheedu waa in barnaamijku daboolayo kharashaadka waxbarashada iyo khidmadaha kaa haray kadib marka la siiyo dhammaan kaalmada kale (sida deeqaha waxbarasho, gargaarada maaliyadeed, gunnooyinka, iyo dhaafitaanka khidmadaha). Amaahda iyo barnaamijyada shaqo-barasho (work study) laguma darin marka la xisaabinayo qadarka maalgelinta aad heli karto. North Star Promise ma daboolo kharashaadka sida hoyga, cuntada, gaadiidka, buugaagta, iyo agabka waxbarashada.

### WAXBARASHO BILAASH AH AYAA KAA CAAWINAYSA INAAD SII WADATO WAXBARASHADAADA SIDA AAD DOONAYSO.

- Qaado shahaado afar sano ah, shahaado laba sano ah, baro xirfad farsamo ama hel shahaado xirfadeed
- North Star Promise kuma xirna barnaamij gaar ah ama takhasus gaar ah Abaalmarinnada lama kala
- hormariyo iyadoo lagu salaynayo meelaha waxbarasho, xirfadaha ama shahaadooyinka gaarka ah
- Fasallada waqti-dhiman iyo kuwa fiidkii waa lagu daray
- Isqor oo qaado ugu yaraan hal credit si aad ugu qalanto
- Wuxuu u furan yahay arday cusub iyo arday soo laabanaya oo buuxiya shuruudaha uqalmitaanka



## Sida loo codsado waxbarasho bilaash ah iyada oo loo marayo North Star Promise.

Si aad u codsato maalgelinta North Star Promise, buuxi FAFSA ama Minnesota Dream Act ka hor waqtiga kama dambaysta ah (fadlan ka eeg bogga internetka macluumaadka ugu dambeeya). Codsigu waxa uu kaa dalban doonaa inaad liis gareyso hay'adaha waxbarasho ee aad qorshaynayso inaad dhigato si aad u hesho shahaado ama shahaado xirfadeed. Haddii adiga iyo qoyskaagu u qalintaan, isla markaana aad dhigato kulliyad ama jaamacad u qalanta, hay'addaada waxay ku siin doontaa waxbarasho iyo khidmadaha qasabka ah oo bilaash ah taas oo qayb ka noqon doonta xirmada gargaarkaaga maaliyadeed.

Shuruudda keliya ee waxbarasho si aad u sii waddo helitaanka waxbarasho bilaash ah waa inaad sii waddo buuxinta heerarka Horumarka Waxbarasho ee Lagu Qanco (Satisfactory Academic Progress – SAP) ee dugsiigaaga, taas oo micnaheedu yahay inaad ku socoto waddadii aad ku dhammayn lahayd shahaadada ama shahaadada xirfadeed ee aad damacsan tahay.

Haddii aad raacdo shahaado laba sano ah, waxaad heli kartaa waxbarasho bilaash ah ilaa 60 credit. Haddii aad raacdo shahaado afar sano ah, waxaad heli kartaa waxbarasho bilaash ah ilaa 120 credit. Tirada ugu badan ee credit-yada u qalma waxbarasho bilaash ah iyada oo loo marayo North Star Promise waa 120 credit.

## Shuruudaha U-qalmitaanka oo Dhammaystiran

- Noqo arday deggen Minnesota.
- Yeelo Dakhlaga Guud ee La Hagaajiyay ee qoyska (Adjusted Gross Income – AGI), sida lagu soo sheegay FAFSA ama Codsiga Minnesota Dream Act, oo ka yar \$80,000.
- Lagaa aqbalo ama dhigato hay'ad waxbarasho sare oo dawli ah oo Minnesota ku taalla ama Kulliyad Qabiil.
- Isdiiwaangeli adigoo qaadanaya ugu yaraan hal credit.
- Isdiiwaangeli barnaamij ama koorso waxbarasho oo ku jihaysan shahaado jaamacadeed, diblooma, ama shahaado xirfadeed.
- Buuxi heerarka Horumarka Waxbarasho ee Lagu Qanco (Satisfactory Academic Progress – SAP) ee dugsiigaaga.
- Ha hore u kasban shahaado baccalaureate (afar sano ah), oo ay ku jiraan shahaadooyin laga kasbaday dal shisheeye.

- Ha ku jirin dayn-bixin la'aan (default) oo ku saabsan amaah arday oo dawlad-goboleed ama federaal ah.
- Buuxi waqtiga kama dambaysta ah ee codsiga.

## KULLIYADAHA IYO JAAMACADAHA U QALMA

MINNESOTA STATE COLLEGES AND UNIVERSITIES  
[www.minnstate.edu](http://www.minnstate.edu)

UNIVERSITY OF MINNESOTA CAMPUSES  
[www.system.umn.edu](http://www.system.umn.edu)

### TRIBAL COLLEGES:

Fond du Lac Tribal and Community College  
[www.fdlc.edu](http://www.fdlc.edu)

Leech Lake Tribal College  
[www.lltc.edu](http://www.lltc.edu)

Red Lake Nation College  
[www.rlnc.edu](http://www.rlnc.edu)

White Earth Tribal and Community College  
[www.wetcc.edu](http://www.wetcc.edu)

## MACLUUMAAD DHEERAAD AH:

[ohe.mn.gov/northstarpromise](http://ohe.mn.gov/northstarpromise)  
[NorthStarPromise.OHE@state.mn.us](mailto:NorthStarPromise.OHE@state.mn.us)